Xikmadda Magacyada Soomaalida iyo Caqabadaha ku Xeeran

Anwar Maxamed Diiriye

Sebt 07, 2010

"Dad badan waxa ay la tahay in magac uu magac iska yahay oo aan wax micne ahi ku jirin. Laakiin ciddii ay sidaa la tahay waa hubaal in wax iska beddelayaan haddii ay dheehdaan dhaqanka Soomaalida. Soomaalidii hore, intii aan ifka dad kale uga iman aakhirana aan looga soo warramin, waxa ay la bixi jireen magacyo iyaga u gaar ah oo ku fadhiya micne buuxa. Magacyadaasi waxa ay ku bixi jireen siyaabo kala duwan".

Cabdi Aadan Cabdille "Ceelow." *Hal-abuur, Xirmo I, Tirsi I, Xagaa 1993. Murtida Magac-bixinta Dhaqanka Soomaalida*. Boggaga 19-21.

Hordhac

Magac waa eray ama tix, qof ama wax kale astaan looga dhigo oo loogu yeero; waa war wanaagsan oo qof ama ummad guud u meel mara; waa wax qof, ummad, dal ama dadyow ay caan ku yihiin oo lagu asteeyo. Magacu waa summad; waa baadisooc; waa astaan wax kala hagta oo muujisa sida dad, dalal, dhulal & ashyaa'i u kala soocan yihiin una kala duwan yihiin. Wax walba oo abuurani adduun & aakhiraba waxa ay leeyihiin magac u khaas ah oo looga garto waxyaalaha kale ee la ayniga ama ka ayniga ah.

Intaa marka looga gudbo dulmaridda tafaasiisha erayga magac iyo xikmadda uu xambaarsan yahay, waxa mudan in la xuso halka ay qotomaan xididada asalka ah ee magacyada Soomaalidu. Magacyada Soomaalidu sida ummadaha kaleba waxa ay iskugu jiraan kuwo u gaar ah dadka ku abtirsada ama kuwo ay la wadaagaan dadyow kale oo ay xadaarad, dhaqan ama caqiido isku keentay oo ay si gaar ah iskugu toshay. Ummadaha ay Soomaalidu magacyada la wadaagtaa waa kuwo ay kala dhexeeyaan dano gaar ahi ha badnaadaan ama ha yaraadaane. Magacyada Soomaalidu ay la baxdaa way noocyo badan yihiin waxase ugu muhiimsan laba farac oo kala ah magac guri asal ah *'dhalad'* iyo kuwo dhaqammo & afaf kale laga soo ergeystey oo *'dool'* ah.

Haddaba iyada oo la xeerinayo loolanka u dhexeeya magacyada dhaladka ah & kuwa doolka ah iyo mushkiladda haysata magacyada Soomaalida marka laga dheehdo dhanka dhigaalka & xulashada, warqaddani waxa ay isku deyi doontaa in ay si miisaaman uga hadasho una soo bandhigto iyada oo dhinacyo badan ka eegi doonta marxaladaha magacyada & magac-bixinta Soomaalidu soo martay, halka uu maanta joogo, xikmaddooda, caqabadaha ku xeeran, unugyada caqabadaha sida dhimir-maskaxeedka bulshada, habeeno-aragtiyeedkii berisamaadka & talooyin ku wejehan sidii caqabadahaas loogu baraarugi lahaa, loogana gudbi lahaa ama loo sixi lahaa.

Hor & abaato cid caddeyn kartaa ma jirto xilliga ay isku barxameen magacyada dhaladka ah & kuwa doolka ahi. Haddii aad u fiirsato dhigaallo hore oo laga hayo habkii sinji-raaca Soomaalida & abtirsiimadooda oo aad u hollato in aad xilliyeyso isku milanka magacyada waxaa dhab ah in aad ku

Copyright © 2010 WardheerNews.com

hungoobayso kalana huleelayso niyad jab & maxsuul la'aan, sababtuna waxa weeye iyaga oo iskugu falagsamay si aan la oddorosi karin oo aan kuu sahlayn in aad inta dib u fariisato aad maanka ku godliso dabadeedna ku listo. Haddaba taasi sheegid uun bay mudan tahay ee ma ahan nuxurka mawduuceenna.

Xikmadda

Dhalad: kuwani waa magacyada asalkoodu ka soo jeeddo afka Soomaaliga & kuwo aan sidaa u badnayn oo iyaguna ka soo jeeda afafka uu Af-Soomaaligu bahda la yahay ee Cushitics-ka, gaar ahaan teeda bari (eastern cushitics). Murtida guud ee xikmadda magacyadani waa in ay hayaan macaanka afka & astaamo hiddeed fac weyn, mid walba oo ka mid ahina uu xambaarsan yahay ujeeddo dhaqameed mug leh.

Dhaladku waa magacyo marxalado kala duwan soo maray oo inkasta oo maskaxdeena ay ku tiran yihiin in ka mid ahi, haddana la oran karo badidoodu waxa ay ka sii hoobanayaan karkaar walhanaya oo sababi kara in ay dabar go'aan boqolka sano ee soo socda ama in ka yarba haddii aan la dabaqaban. Caaradkii hore ee magacyada Soomaalidu waxa ay u badnaayeen kuwo aan diin ku tiirsanay, laakiin xilliyo dambe sababo diimeed & hab-dhaqan soo kordhay awgiis magacyadaasi way mayrmeen ama way barxameen. Tusaale, intii ayan diinta Islaamku iman geyigeena waxaa iska cad ayna tahay in magacyo aan maanta wax badani ka sii noolayni ay geyiga caan ka ahaayeen. Waynu ognahay in ruuxa uummani uu mar walba dareensan yahay in awood isaga ama waxa ku wareegsan u talisaa jirto, waana taas tan loo cintiqaadaa in awooddaasi kor jirto oo uu "Sarreeye' meel joogo, waana iyada dadku marka wax ka yaabiya ay la tacaalyaan ay kor u dheehdaan ama gacmahaba ugu taagaan iyaga oo ciirsi bidaya.

Calaamadaha caynkaa ahi waxa ay na bareen in geyigeena intii ayan diini iman ay magacyo ku isman ama xadfan *'Sarreeyayaal'* kala duwan oo si uun loo aamminsanaa ka hor intii aan maankeennu xorroobin ee ayan caqiidada diimaha samaawiga ahi carrigeenna iman. Kii ugu caansanaa *'Sarreeyayaashaasi'* waa kii la aamminsanaa in uu roobka, abaarta, masiibada, barwaaqada iwm uu ka mas'uul ahaa ee *"Waaq",* loo yiqiin. Haddaba halka maanta aynu Cabdullaahi, Cabdiraxmaan iyo kuwa la midka ah ee muujinaya awoodda *'Sarreeyaha'* xaqa ah ee keligii addoomaha loo yahay ay astaanta u yihiin magacyadeena, waagaas waxa badnaa kuwa ay ka mid ahaayeen:

Magacyadii Islaamka ka hor lagala bixi jirey geyiga Soomaaliyeed	**Micnaha**
Addoonwaaq	Addoon-Eebbe "Cabdullaahi"
Amartiwaaq	Ku dhashay amar Allah
Barwaaq	Dhicis Eebbe sahlay ama kob Eebbe
Shirwaaq	Dhashay xilli shir loo fadhiyo
Diintiwaaq	Diintii Eebbe
Biddewaaq	Addoon-Eebbe "Cabdullaahi"
Siinwaaq	Allaa na siiyey "Gallad-Eebbe" weeyaan
Yabarow	Daweeye: mid wax dabiiba oo gacantiisa & candhuuftiisaba lagu dawoobo; awood qarsoon leh (maanta waxa uu u xuubsiibtay qof diinta Alle yaqaan oo iyada akhriskeeda wax ku dabiiba 'yabareeya')

Copyright © 2010 WardheerNews.com

Guulle	Eebbe, Illaah; Sarreeye ama mid aan la hollin oo had & goor lib u joog ah. Waxa la filayaa in uu magacyada Soomaalidu la baxdo kuwii ugu horreeyey ka mid ahaa!

Jaantuska 1.1

Fiiro Gaar: Waaq, maanta waa Allaha keliya ee aynnu aamminsanahay, kolka haddii aad maqasho ayeeyo ama awoowe leh *"Waqay & Waaqay"* uma jeedaan *'Waaqii'* hore ee diin la'aanta ee waxa ay u dan leeyihiin wax ay la yaabeen oo ay u cuskanayaan magaca *'Sarreeye'*, macnuhuna waxa uu u dhuranayaa *"Weligay & Allahay"*. Magacyadaas dhammaantood waxa ay maanta u xuubsiibteen kuwo caqiidada dadkoodu hantay la hantiyey!

Dool: Soomaalidu waa iyada ku maahmaahda *"saaxiibkaa mar ku diin, mar ku dayo marna ka darrow e',"* kuwani waa magacyo laga soo qardeystay afaf ama dhaqammo qalaad, waxana ugu badan kuwa ka soo jeeda afka ama xadaarada Carabiga oo aynu ood-wadaag nahay, sida (Anwar, Zahra, Farduus, Zuhuur, Zuhayb, Salma, Salmaan iwm) ama waa kuwo ka sokow in ay afkaas ka soo jeedaan laakiin ah magacyo caqiidadu waddey oo diinta laga nisbeystay kuwaas oo badankooda aan ku doodi karno in ay u xuub siibteen magacyo dhalad ah sida (Maxamed, Axmed, Maxamuud, Xaamud, Cabdullaahi, Cabbdulmajiid, Cabdulqani iwm).

Magacyada dhaladka ahi waxa ay muujiyaan hidde, deggaan iyo asal ahaan halka ummaddu ka soo jeeddo, kobta juqraafi ahaan aynu dunida kaga nool nahay, xilli ama marxallad dhalasho, ama waxa ay cabbir muuqda ka bixiyaan muuqaalka ilmaha, qaab iyo qeex uu waalidku la jeclaado ama u saadaaliyo iyaga oo u cir-aaneynaya. Mar-marka qaarkood laga yaabee haweeneey ama nin jeeska ka tirsan ama ka tirsanaan jirtay/jiray in loogu magacdaro ilmaha oo lagu sammiyo.

Cilmi-nafsiyahannadu (psychologists) waxa ay sheegaan in haddii ilmuhu guud ahaan gaar ahaanna gabdhuhu ay ku faraxsan yihiin magacyadooda, in ay aad ugu kalsoonaanayaan nafsaddooda inta ay ifka joogaan. Sidaa darteed, wakhtiga kaaga baxa ka baaraandegga u raadinta magaca ugu habboon, qurxoon, dhawaaq wanaagsan carruurtaadu, kayd weeye aad mustaqbalka u aydo. Waxa ay magacyada dheddigi nisbeeyaan joog, jaah, qurux, midab, ama habsamaanta gabadha sida gaarinnimadeeda, geesinnimadeeda iyo naxariisteeda.

Tusaale, inantii ugu horreysey ee *Ashkiro*[1] loo baxshay, laga yaabee in looga jeeday in ay lahayd midab aad u casaan ah oo guduud xigeen ah. Sidaa oo kale, *Qumman,* inan weeye hagaag, hufnaan iyo wanaag badan loo nisbeeyey. Hablaha qaarkood waxaa loogu magacdaraa dhirta, caleenta, iyo ubaxa, sida Cosob, Magool, Ubax, iwm, xayawaannada sida Qalanjo. Qaar kalena waxa la siiyaa magacyada xilliyada iyo maalmaha sida *Gu'dhalad, Isniino, Axado, Jimco, Sabtiyo* iwm.

Dhanka kale magacyada ragga loo bixiyaa iyaguna waxa ay sal & raad muuqda oo hiddeed u yihiin afka & dhaqanka bulshada. *Diiriye,* waxa loo malayn karaa in loo bixiyey wiil lagu farxay dhalashadiisa oo dhashay xilli ayan labada waalid muddo dheer wax ilmo ah yeelan ama ay gabdho badan laahaayeen oo ay wiil dhalashadii u xiiso qabeen; waa kii lagu diirsaday ujeedku siday doonto xaalladdu ha noqotee. *Samakaab, Samatar, Samaale, Samow & Samatalis*, waxa ay tilmaamayaan duco lagu soo dhoweeyey

[1] Dhiimo; casaan aan ahayn kan saan-caddaalaha oo kale laakiin Soomaalida cajabiya

Copyright © 2010 WardheerNews.com

wiilasha loo bixiyey & khayr u saadaalin si ay uu u noqdaan kuwo samaha astaan & tiir u noqda. *Sugulle, Ashkir, Migil, Bootaan, Beyle, Bullaale, Qaaje & Caddow,* midabyo ayey tilmaamayaan. *Jimcaale, Bariise, Hiraabe, Galab, Fiido, Fiidow & Rooble,* ammin iyo goor dhalasho ayey u taagan yihiin. *Cawo, Hoodo, Naruuro, Nasteexo, Ayaan & Nasiib,* iyaguna farxad iyo rayn-rayn duco lagu soo dhoweeyey gabdhaha loo baxshey ayey tilmaan u yihiin. Haddaba miyaanay noo caddayn in magacu yahay aqoonsi qofku leeyahay oo muujinaya halkuu qofkaasi dir iyo isir ahaan ka soo jeedo? Waxa ila habboon in aan la dhayalsan, la baylihin, lagana tegin oo aan la sahashan afka iyo luuqadda, dhaqanka iyo hiddaha magacyadu ku salaysan yihiin oo ay ku qotomaan.

Haddii aynu waxoogaa isla dheehanay xikmad wanaaga magacyada Soomaalidu huwan yihiin, bal imikana aynu dhan kale u kacno oo isla eegno sida ummaddu u hagratay ama ay uga doorteen magacyada kale ee la ayniga ah lakiin ka soo jeedda dhaqamadda kale, sida kuwii Carbeed ee aynu soo dul-xaadiney.

Unugyada Caqabadaha

Laba arrimood ayaa ugu muhiimsan caqabadaha hareeyey magacyada Soomaalida, waxa ayna kala yihiin:

A. Xulasho Silloon

Xulashada magac-bixintu waa bilowga kaydinta dhaxal dambe oo dhaqan & afba dugsanaya. Waayihii hore waa la arki jirey in magac-bixinta lagu saleeyo arrimahaas; waayahan dambase habkii ilbaxnimada ee la isbiday ayaa bulshadii u fasiratay si khaldan oo waxa ay is tuseen tiiyoo aan laga digtoonayn in hore dhaqan gaboobey looga gudbey, kaas ayaana la yimid dhibkiisa. Dad badan oo ka soo laabtay dunnida Carabta ama adduunyo kale oo ay soo arkeen ayaa la soo noqday fikrado kala duwan oo lagu sirmay una arkay in ku dayashada dhaqammada bulshooyinka ay soo arkeen ay aad u fiican tahay, halka dadyow kale oo aan marna dalka ka bixinina ay u arkeen isticmaalka magacyada Carabta kuwo barakeysan oo aakhiradooda waxtar u leh iyaga oo aan u kuur gelin kee ayaa magac Islaam ah keebaanse ahayn! Jidbada caynkaa ahi waxa ay u badatay in ilmihii magacyo shisheeye oo Carabi u badan loo bixiyo. Intii yarayd ee magacyadii dhaladka ahaa ee astaanta & macnaha qotada dheer leh huwanaana, xilliyo dambe ayey markii ay kobceen dhaxalkii waalidku ugu roonaadeen sida (*Marwo*[2]*, Doombiro*[3]*, Falxado*[4]*, Faaraxad*[5] iwm) ay cidla uga dhaqaaqaan oo ay ku beddeshaan kuwo qalaad sida (Istanbuul, Barlin, Hani, Lucky iwm) iyaga oo u arka magacyadooda kuwo gaboobey, laga tegey, wax macne ah oo fiicanna aan xambaarsanayn. Dhallinta caynkaa yeeshay kuma riyoon in ay sidaa yeelaan ee bulshadii ay ku dhex noolaayeen ee indhaha u ahayd ayey ka qaateen *habeeno-maskaxeed* oo waa tii hore loo yiri *"ratiga dambe, ratiga hore saanqaadkiisa ayuu leeyahay"*.

Dooddii hore ayeynu ku jirnaaye, koox kale magacu haddiiba uu Af-Soomaali yahay way ka cadanyoodeen oo waxa ay ku doodayaan in magacii wanaagsanaa ee Qur'aanku ka dardaarmay uu yahay kan Carabiga oo keliya iyaga oo islaamka & afka Carabiga iskugu milay si toos ah oo aan caddeyn diimeed wadan. Haddaba haddii *Samatar, Samakaab, Samawada, Saxarla', Saluugla',*

[2] Dhalanwanaag, xilkasnimo, xishood, sarriig, anshax; dhabeel (dabci wanaagsan)
[3] Barwaaqo (magac gabdhaha loogu roonaado oo nuxur & nur khayrba looga jeedo)
[4] Nasiib, Cawo & Ayaan
[5] Faraxsan (dabci wanaagsan)

Copyright © 2010 WardheerNews.com

Warsame & Samaale ay noqon waayaan magacyo suubban oo Islaamka ka turjumaya ma waxaa noqonaya *Anwar*[6]*, Sundus*[7]*, Sureya*[8]*, Raani*[9]*, Zuhuur*[10] *& Nucmaan*[11]*,* waayo waa Af-Carabi uun sidaa ayeyna ku muteysteen qaddarinta, miyaa? Waa la hubaa markii magacyada bixintooda & dhigaalkoodaba uu doorsoon ku dhaco in xayndaabkii ama makaabkii adkaa ee dhaqanka & afkaba (weliba aan qornayn) u yiil uu jabayo; su'aashuna waxa ay tahay yaa ilaalinteeda laga rabaa? Ma ilmaha mise waalidka? Waxa ay ila tahay in waalidku wixii ay dhigaaliyaan uu noqon doono maxsuulka & miraha ay ilmahoodu dhaxal ahaan u guran doonaan, ayna mudan tahay in hawshaa si wada jir ah loo wada jirto la iskuguna gudbiyo.

Marka aad eegto maanta hab-xulashada magac-bixinta ee ay dadka Soomaalidu adeegsadaan, waxa kuu caddaanaysa in magacyada doolka ahi ay bara-kiciyeen kuwa dhaladka ah oo weli sii nool laakiin gabaabsi ah. Marka dhulka Soomaalida laga eego dhanka kala qoqobnaanta uu saan-caddaalahu sababay waxa aad ogaanaysaa in la bixidda magac Soomaaliga asalka ahi uu si xoog leh uga suulayo dhulweynaha Jamhuuriyadda marka la barbar dhigo gobolada kale ee ka baxsan ee Soomaalidu degto sida Jabuuti, Waqooyi Bari Kenya & Kililka Shanaad ee Ethiopia. Mandaqadahaas weli magacyada dhaladka ahi karaamo ayey ka leeyihiin, walow sidii la rabey ayan u xafidnayn oo ay qudhooda ka sii hoobanayaan. Markii aan doodo aqoon-wadaag la yeeshay aqoonley & dhaqanyaqaan badan oo gole & goobjoog u ahaan jirey sooyaalka Soomaalida xilliyo kala duwan & goobo kala duwan, waxa ii soo baxay in kala duwanaanshahaas & aqool xumidaas, marka laga hadlayo deggaamada Soomaalidu degto ee geeska Africa ay sababeen arrimahan soo socda qaarkood ama gebigoodba:

- Dadka Soomaalida ah ee ku dhaqan dhulweynaha Jamhuuriyaddu inta badan tartan kulama jiraan qowmiyado kale halkaasna habacsanaan iyo waayo aragnimo la'aan ay keentay keli noolaanshuhu ayaa ka timid; halka shacabka Soomaalida ah ee ku nool mandaqadaha kale ay har iyo habeen madaxa iskula jiraan ummado kale oo ka badan, ka dhaqan iyo afba duwan oo ay tartan iyo iska ilaalin xoog leh ay mar walba kula jiraan si aan waxa u gaarka ahi (magaca, afka, dhaqanka & diintu) ayan uga lumin ugana milmin deedna uga suulin. Cabsida caynkaa ahina waxa ay dhaxalsiisay in ay mar walba digtoonaadaan oo ay iska ilaaliyaan bulshooyinka ay la nool yihiin saameyntooda dhaqan.

- Aarradii iyo irabkii afkii hore ee asalka ahaa oo ka sii guraya dhanka Jamhuuriyadda halka uu ku sii xoogeysanayo ama isbeddelka ku dhacayaa uu yar yahay dhanka mandaqadaha kale sababna ay u tahay isku xirnaanshaha jiilasha oo weli qiime sare ka leh gobolada ka baxsan dhulweynaha. Xukuumado aan bulshada la saaxiib ahayn oo xilli dheer majaraha talada hayey & qaran-jankii ku dhacay ayaa ka dhigay degmada jamhuuriyadda kuwo didsan, aan degganayn oo meel cidla ah ay in badan oo dhaqankii & afkii ahi uga lumeen gaar ahaan magacyadii dhaladka ahaa.

- Dagaaladdii sokeeye ee ka dhacay dhanka dhulweynaha oo wiiqay in badan oo xikmaddii dhaqanka & afkaba ah abuurayna dib u dhac xaga beekhaaminta murtida ah. Waxa kale oo ay

[6] Iftiin, nuur, shucaac
[7] Nuucad maro xariira ah oo leh baro-baro qurxoon
[8] Cadceed, welwel la', faraxsan; Faaraxad
[9] Jeeddaalin, jeeqaaqid
[10] Ubax (nooc ka mid ah)
[11] Geed ubaxyo cas-cas leh; qof barakeysan (ragga & dumarkaba waa loo baxshaa) ama qof cas; Calas

Copyright © 2010 WardheerNews.com

dagaaladaasi saameyn weyn ku yeesheen raadad dhimirna ay ku reebeen hab-dhaqanka & garashada dad badan oo reer Soomaaliya ah guud ahaan, gaar ahaanna kuwa qaxootiyoobay ee u doolay dalalka shisheeye. Taa waxa u sii dheer in wixii iskuullo dib looga yab-yabi karey deggaamadaas xilligii qaran-jabka & wixii ka dambeeyeyba ay gacanta u galeen ururo tacliiminta & dhaqanka Soomaaligaba aan dan u arag oo xitaa gabay in ay dugsiyadii ay hantiyeen ka dhigaan afkii ummadda, halka ay ubadkii ku anqariyeen welina ku anqarinayaan dhaqamo & afaf kale oo shisheeye. Mas'uuliyad darradaasi waa masiibo imika qaangaartey, muddo dheerna jirrid-bixinteedu qaadan doonto waagii miyir soo laabto ee dhankaa in loo jiheysto ay noqoto.

- Sidii aynu hore u tibaaxnay, la bixidda magacyada qalaad oo u badan kuwa Carabta ayaa dad badan oo reer Soomaaliya ahi u arkaan arrin barakaysan oo ka faddilan kuwa Soomaaliga ah iyaga oo aan u aabba-deyin macnaha iyo taariikhda magaca ee u arka in magac walba oo Carbeed islaamka ka turjumayo, taas oo aan xaqiiqatan run ahayn una baahan in laga feejignaado si loo kala barto kan diiniga ah iyo kan iska magac Carbeedka ah si looga digtoonaado muhiimad siinta magacyada shisheeye ee aan diinta dadka ku xirayn la bixidooduna ay geesaha ku riixayaan magac kale oo Soomaali ahaa kuna habboonaa in la xafido si aanu u dabar-go'in. Ogow magac walba oo dool ah lalana baxaa waxa uu meesha ka saarayaa mid isaga ka horeeyey oo dhalad ah.

Qiimaha magaca murti badan oo maahmaahyo ah ayay Soomaalidii hore kaga hadashay. Haddii aynu milicsanno inta aynu imika haaban karno waxa aan tusaale u soo qaadan karnaa taxan hoose oo mid waliba si gaar ama si guud uga hadlayo qiimaha magaca & halka uu kaga jiro dhaqanka & afka bulshada, waana sidan:

Meel aadan mudnayn ka muuqashadeed, magac aadan lahayn baa kaa raaca
Muunadeyn magac baa ku wacan, masiibana moqor baa ku wacan
Magac xun qof liitaa leh, magac fiicanna halyey baa leh
Magac aadan lahayn maahir laguma noqdo
Magac iyo manfac meel ma wada galaan
Magac aadan lahayn mawd baa dhaama
Meeshaad martaaba waa nin magacii
Magac aadan lahayn madal lalama tago
Magac aadan lahayn laguma murmo
Magac, magac laguma maydhaamo
Magac laga miskiin ma aha
Magac laysma dhibaasho
Magac bilaash uma baxo

B. Dhigaal Dayacan

Haddii aad u fiirsato hab-dhigaalka magacyada Soomaalidu la baxdo oo dhawaaqoodu ku saleysan yahay hab-codeedka afka Soomaaliga, waxa aad arkaysaa in ay masiibo weyni ku dhacday afartii-tobnaad ee ina dhaaftay, gaar ahaan sannadahan dambe ee dawlad la'aanta & qaran burburka. Magac waliba macne ayuu leeyahay oo in la yiraahdo waxa uu u taagan yahay sidan & sidan waa la filayey wayna tahay, laakiin in marka la dhigayo laga suuliyo asal ahaantiisu waa hawl cusub &

Copyright © 2010 WardheerNews.com

dhimmaal-maskexeed bulsho. Haddii aad tusaale u soo qaadato magaca *(Jaamac),* dhigaal ahaan sida uu afka Soomaaliga ugu dhigmaa waa sida uu qoysaska kore ugu jiro, waxa aadse masiibo & niyad jab u tegeysaa marka aad aragto magacii oo shakhsiga Soomaaliga ah ee u xaglinaya afaf kale oo qalaad ku faankoodu uu u dhigay Jama *(Ingiriis u bog),* Schama *(Talyaani u bog)* & Djama *(French u bog)*. Dhanka kale haddii loo hikaadiyo Maxamed (Mohamed, Muhamed, Muhammad, Mohammad, Muhammed ama Mohammed), way iska caddahay in qofka Soomaaliga ah, kuna hadla afkaas ayan wax dan ahi ugu jirin qarinta *'X-da'* lagu dalqiyey *'H-du'*. Wacays oo loo qoray *(Wais),* xikmad & macne ay sameynaysaa ma jirto waxa ayna maanka ka masaxaysaa ujeedkii magacu lahaa, waana lagu jahawareerayaa oo in uu magacu Soomaali ahaa marna ma haweysan karto qaybta garashada ee maskaxda aadanuhu. *Nuur*[12] oo (*Nur)*[13] loo dhigaa in kasta oo ay macne wanaagsan oo Soomaali ah leedahay haddana xikmaddii magaca Nuur loo bixiyey ayey meesha ka saaraysaa.

Inta aynu ognahay, haddii aynu tusaale u soo qaadano magacyada dadyowga shisheeye way adagtahay in aad aragto qof magaciisa *'George'* la yiraahdo oo si kale u hikaadinaya si uu u qanciyo qof aan isaga la qowmiyad ahayn, waxa uuse kugu khasbayaa in aad magaciisa si saxan u qorto oo aad weliba ugu dhawaaqdo. Tusaale, caalimkii *B. W Andrzejewski* markii uu ka soo haajirey Poland ee uu carro England yimid waxaa caddeyd in magaciisu uu aad ugu dhib batay dadkii Anglo-Saxon-ka ahaa ee uu soo dhexgalay, laakiin magaciisii uma bah dilin hab qalliban si uu u qanciyo bulshadaas cusub ee inta sidiisii u daayey ayuu la baxay mid gaaban oo naynaas ah una sahlan dadkii uu la noolaa kaas oo ahaa *(Gosh).* Tusaale kale waa *Arnold Schwarzenegger-ka* immika guddoomiyaha ka ah gobolka California ee carrigan Mareykanka oo uu magaciisu ka soo jeedo Slavs-ka reer Austria oo aan isaguna magaciisa bah dilin si uu u qanciyo dadka uu la nool yahay ee aan asalkoodu ka iman bariga Yurub. Ilaa maanta dad badan oo ka ag dhow ama ka ag dhowaa labadaas shakhsi ayaan karin magacyadooda laakiin ku kalsoon sida ay u yiraahdaan, una maleyn maayo in *Cabdinuur & Cabdixamiid* ay ka adag yihiin *Schwarzenegger & Andrzejewski*, laakiin waxa lagu kala tegey waa dhiifoonaanta & ku kala hor baraaruga ilaalsiga astaamaha bulsho ee gaarka ah.

"Summad awoowiye sinji waa ma guuraan", magaca turjumaad waa lagu sameyn karaa macnahiisa laakiin hab dhigaalkiisa oo la beddelaa waxa ay ka dhigan tahay tiiyoo inta ruux haraga kore laga fiiqay wejigiisa lagu dhejiyey ruux kale astaantiisii oo markaa ruuxaas la dhalan-rogey uu kaga kalsoon yahay abbuurtiisii hore midda lagu kabay ee been abuurka ah.

Haddii aad barbardhigto magacyadeenna bulshooyinka nagu xeeran ama kuwo kale qaarkood waxa kuu soo baxaya in degganaansho la'aani ku baahdey magacyadeena dhanka bixinta & dhigaalkaba. *Mehmet*, waa *Maxamed* wata dhawaaq & dhigaal Turkish, inta badana waxaa qaalib ah in ay sidaa u dhigaan, halka inaga uu hal dhawaaq noo leeyahay uuse seddex ka todoba is-carrabtir-dhigaal hadba dhan noogu dabayliyo sidii aan hore ku soo aragnay. Tusaale kale u soo qaado laba qalinle oo Afrikaan ah, *Nuuradiin Faarax* oo aad hab-dhigaal kale ku arkayso magaciisa sida *Nuruddin Farah & Wole Soyinka* oo aadan hab kale ku arkayn, sababtana aan garashada u deyno in kasta oo iyada oo dadban warqaddani jawaab hore uga bixisay! Magacyadeenu waa kuwo ku qotoma macnayaal aad u murti iyo qiimi badan waana kuwo aynu astaan ahaan ama summad ahaanba aan aad ugu faani karno, muujin karana xididka dhabta ah ee dhaqankeena iyo dadnimadeenaba, ilammana ahan in ay jiraan magacyo ka wanaagsan oo

[12] Casaan; qof dhiig furan (kajankana qof aad u madow oo loogu duur-xulayo ayaa loo baxshaa ama qof loogu cir-aaneynayo in uu reerka nuur u dhashay yahay oo khayr soo ifbixiisaa ahaaye weli khayr kale loogu sii naawilayo aayaha)

[13] Goor wanaagsan oo ka mid ah xilliyada roobka ee dooggu hilaaco; wax wanaagsan oo lagu kifaaxo; tayo; raandhiis ama cirib-dambeed

Copyright © 2010 WardheerNews.com

booskooda inoo beddeli karaa. *Magacu waa buug oo kale, waxa uuna u baahan yahay in la akhriyo si waafi ahna loo fahmo xikmaddiisa.*

Sinjiguurka ku socda hab dhigaalka magacyadeena waxaa sabab u ah baa la oran karaa afar arrimood oo intooda badan ay bulshadeenu mas'uul ka tahay, inta soo hartayna ay ku qabsatay tahay, waxa ayna kala yihiin:

- Daahitaankii ay soo daahday far la isku raacsan yahay oo matasha ama xafidda dhigaalka afka Soomaaliga ka hor 1972kii, marka laga reebo far-guriyeedyaddii berisamaadka ee aan baahsanayn sida Far-Soomaaligii Cismaaniyada ee Cismaan Yuusuf Keenadiid, Fartii Boorame ee Sheekh Cabdiraxmaan Sheekh Nuur Qaadi, Fartii Xuseen Axmed Kaddare iwm.

- Saan-caddaalihii & dhul-mareennaddii kale ee shisheeyaha ahaa oo dalka yimid oo magacyadeena u hikaadiyey una qoray sidii ay carrabkooda iyo dhuuntooda uga dhex sanqarayeen dhegohooduna u maqlayeen. Iyagu taas waa ay ku saxnaayeen oo wax ay tixraacaan uma sahlanayn, waxa ayse arrintaasi *garaad-wareen* ku riddey aqoonleydii beri-samaadka oo hayaamay hayaan aan sahan lahayn, moodeyna dhaan-dabagaalle, biyo lagu harraad-bixi doono.

- Garwadeenkii bulshada oo aan ku baraarugin mushkiladdda ku dhacday hab dhigaalka magacyadeena goor hore oo markii farta la qorayna la seegay fursad qaali ahayd, ayna habboonayd in fartii ugubka ahayd lagu sidko laguna sharciyeeyo hab dhigaalka dhawaaqa magacyadeena, halka la habaabay oo hab dhigaalkii qalaad ee la dhaxlay uun laga dhigtay dhaqan inkasta oo mas'uuliyad weyn gadaalse ka dhicisowdey la muujiyey.

- Iyo halka ugu daran oo ah in ay dadkeenii xilliyadaas aqoonta higsanayey iyo intii kale ee iyaga ku raad xigtayba ay carrab-la'aantii saan-caddaalaha u sacabba tumeen ayna isticmaalkeedii ka dhigteen wax muqadas ah oo aan wax laga beddeli karin, ayna tahay in lagu boggaadiyo loogana daydo iyaga taas oo dhaxalkeedii jiilal is daba taxan uu marin habow ku ridey dhawaaqii dhuuntooda ka imanayeyna uu ka dhigay wax ceeb ah oo laga xishoodo.

Si aynu u fududeyno fahamka doodda warqadan, aynu ku wada nasano shaxdan hoose ee ay ku dhigan tahay magacyada Nebiyada qaarkood, kuwaas oo magacyadoodu ay asal ahaan ka soo jeeddaan Towreedka reer Banu-Isreal, dabadeedna lagu sheegay Furqaanka Islaamka. Waxa aad arkaysaa marka farta Laatiinka lagu dhigayo in Carabta & Yuhuudduba ay codka carrabkooda ku dhigaaliyaan kuna dheellitiraan, halka Soomaalida casri is-bidka ahi ay kala qaloodaan dhawaqooda dhigaalkooda:

Hebrew	***Carabi***	***Soomaali***	***Dhalanrog***	***Macne***
Iyyôb	Ayyūb	Ayuub	Ayub	Toobad keene; lagu dhibay wax uu aamminsanaa
Yôsēp	Yūsuf	Yuusuf	Yusuf/Yousuf/Yousouf	Siyaado Allah; mid Alle barakeeyey

Copyright © 2010 WardheerNews.com

Dāwi	Dāūd	Daa'uud	Da'ud	la jecelyahay
Yišmāêl	Ismāīl	Ismaaciil	Ismael	Alle maqlay; addeecay; rumeeyey
Yiāq	Is'āq	Isxaaq	Ishaq	Qoslahaye; Farxaan
Yaªqōb	Yaqūb	Yacquub	Yakub	Kii toobad keenay; khalad ka soo laabasho; soo noqod; barabixin; jid toosan raacid
Ādām	Ādam	Aadan/Aaden/Aadam	Adam	bilow; nin; abuur, duni; insi
awwāh	awwā	Xaawo/Xaawa	Hawa	Hawo diirran; Horreyso

Jaantuska 1.2

Bal jaantuskan kalana aynu ka dheehanno is-yeel-yeelka & carrab-la'aanta aan Illaahay na badin ee aynu isbadnay inaga oo ka xaglinayna dhawaaq-codeedkayaga una xaglinayna kuwo ummado kale:

Soomaali	***Ingiriisiyeyn***	***Talyaaniyeyn***	***Faransiiseyn***	***Macne***
Jaamac	Jama	Schama	Djama	Kulmiye; wax laga barakaystay kitaabka islaamka
Faarax	Farah	Farah	Farah	Farxaan; wiil farxad u saaxiib ah oo ay murugo ka dheer tahay (lab)
Farax	Farah	Farah	Farah	Farxiya; gabar farxad u saaxiib ah oo ay murugo ka dheer tahay (dheddig)
Geelle	Gelle	Gelle	Gualleh	Qof geel badan iyo hodantinnimo loogu cir-aaneynayo; barwaaqo
Cumar	Omar	Omar	Omour	Cimri dheeri
Oomaar	Omar	Omar	Oumour	Karahaye; dabci kulul
Cawo	Awo/Awa	Awo/Awa	Auwo/Auwa	Nasiib, ayaan, Habeen-dhalad
Wacays	Wais/Wa'is	Wais/Wa'is	Wais	Barakeysan; duco-qabe ah
Diiriye	Dirie	Diria/Diriye	Diria/Deriya	Lagu diirsaday; farxay; loo bogey
Cawrala'	Awrala	Awrala	Ourala	Ceebla'; aan iin lahayn

Copyright © 2010 WardheerNews.com

Cabdinuur	Abdinor	Abdinoor	Abdinour	Addoonkii Iftiin Badane
Cabdiqani	Abdigani	Abdighani	Abdighani	Addoonkii Taajir
Cureeji	Ureji	Ureji	Oureji	Sharaf leh; qaali ah
Qalanjo	Kalanjo	Kalanjo	Kalanjo	qurxoon oo dabci wanaagsan

Jaantuska 1.3

Waxa jira magacyo ka badbaadey dhalanrogyadaas oo af kasta oo lagu dhigo aan hab-dhigaalkoodu isbeddelin sababtuna ma ahan in la ilaashaday ama si gaar ah loo xafitay, ee waxa weeye waxa ayan ku lahayn bilowga, dhexda & dhammaadkaba shaqallo dhaadheer ama shibbanayaasha dhiilloobey ee la shiddeeyey oo kala ah X, C, H, Q, KH, SH & DH. Eeg jaantuska hoose:

Soomaali	Ingiriisiyeyn	Talyaaniyeyn	Faransiiseyn	Macne
Hira	Hira	Hira	Hira	Dheer oo cas
Sagal	Sagal	Sagal	Sagal	Tilmaan wacan leh, qurxoon; barwaaqo
Samawada	Samawada	Samawada	Samawada	Qof mar walba wanaag, khayr & samatalin u astaan ah
Samatar	Samatar	Samatar	Samatar	Qof mar walba samaha u hiilliya oo gargaara
Milgo	Milgo	Milgo	Milgo	Wanaagsan, qurxoon, oo xikmad badan; madow; barwaaqo
Warsame	Warsame	Warsame	Warsame	Warsan iyo khayr sheeg
Sahal	Sahal	Sahal	Sahal	Qof wanaagsan oo dabci fiican leh; si fudud u dhashay oo aan lagu dhibtoon; loo baqay intii uu caloosha ku jirey, soose badbaaday.
Abyan	Abyan	Abyan	Abyan	Dhammeys; Dhamme (lab)
Ebyan	Ebyan	Ebyan	Ebyan	Dhammays; dhammo; idil (dheddig)
Barni	Barni	Barni	Barni	Qurxoon oo aad u cas; timiro

Copyright © 2010 WardheerNews.com

Libin	Libin	Libin	Libin	Guul; gacansareysa ama gacan sarreeya (lab & dheddigba)
Mahad	Mahad	Mahad	Mahad	Gallad; loo bogey oo la jecleystay; libin
Geri	Geri	Geri	Geri	Dheer, qurxoon oo xoogna leh.
Harti14	Harti	Harti	Harti	Nin; geesi, gashaan; xoog leh; is-garabsi; is-kaashi.
Fahma	Fahma	Fahma	Fahma	Maskax furan oo si sahlan wax u fahamta; Faahimad.

Jaantuska 1.4

Gunaanad & Tallooyin

Bulsho waliba waxa ay ku asteysan tahay kuna xafidan tahay sida ay ugu fara-adaygto waxa u gaarka ah inteeda fiican ayna uga dheeraato inteeda xun, markaa waa lama huraan in ay xafidato astaamaha wanaagsan ee dhaqankeeda & afkeeda sida magacyada, maahmaahaha, maansada noocyadeeda kala duwan & dhammaan kaydka laga dhaxlay awoowayaashii & ayeeyooyinkii hore. Taas ayaa ah tan muujisa muunnadda, sharafka & xaddaaradda bulshadaas, waana taas tan ay ummadaha kale kula tartantaa ama ay la shirtagtaa marka laga hadlayo hoddantinimadda sooyaalkeeda, waana taas tan ay tahay in jiil waliba xilligiisa u kaydiyo una gudbiyo jiilka xiga.

Af-shisheeye waxaa loo bartaa laba arrimood oo kala ah: (a) in aad aqoon kaaga maqan ku daalacato ama ku raadsato; (b) iyo in qof ama dad aan ku afgaranayn aad dannahaaga uga qunsato toodana ugu qumiso oo ah waxa loo yaqaan *wada-xiriir-bulsho*, midkood uun. Afafku waxa ay ku jiraan tartan & is riix-riix, waxaana mar walba ugu badbaado badan tii hadba bulshada ku hadashaa ay jiritaankeeda ku mitiddo ama hannata xilliba xilliga ka dambeeya ummaddo kale oo barashadeeda u heellan ujeedkay doonaanba ha ka lahaadaane. Carrab dalab, tuur & tilmaan adag leh marna laguma baxnaanin karo lagumana kaydin karo dhaqan bulsho. Magaca isaga in kiisa wanaagsan lala baxo, diin & dhaqan wanaagsanna lagu teediyaa way wacan tahay, laakiin mid kaagu ka fiican yahay diinna aan kugu dhoweynayn, la bixiddiisa xaddaaradna laguma kasbado, saacidina uu maayo jiritaanka kan dhaladka ah ee looga hiillinayo waa uuse suuriyaa!

Bal u fiirso Chinese-kan magaciisu yahay *'Xiong'* oo hab dhigaalkaas aan waxba laga beddelayn markii Latin lagu dhigayo si uu u noqdo *'Hiong'* si loogu qanciyo ummaddaha aan karin *X-da* xarafka *H-da* oo u sahlan halka inaga *'Xaadsan'* ay ka noqotay *'Hadsan'*, waana hubaal in arrimahaas oo dhami ay mudan yihiin ku dayasho si loo badbaadiyo astaantaamaheenna ayna tahay in magacyadeena loo qoro sida ay codadkeena ku yihiin dhegeheenana ay ugu dhacaan iyadoo aan cid kale loogu hiillinayn laguna qancinayn nabaad-guurka aynu gacmaheena ku sababayno ee aannu la beegsanayno *summad-qowmiyadeedkeena*.

[14] waxa nala wadaaga macnayaasha magacan qaarkood Oromada & Canfarta

Copyright © 2010 WardheerNews.com

Haddaba gundhiggu waxa uu yahay in hab dhigaalka magacyada Soomaalida oo ah mid laga il-duufay agloolidooda intii goori goor ahayd dib loogu laabto looguna baraarugo xasilintooda iyada oo la kala araareynayo is hirdiga uu kula jiro afafka ka faca weyn iyo ummadaha carrabkooda loogu hiillinayo in summadeenii lagu sabaaliyo. Afku waa Soomaali, dhaqanku waa Soomaali, ummaddu waa Soomaali, magacuna waa summaddoodii waana Soomaali ee waa in hab dhigaalkiisa lagu mayracaa maskax caafimaad qabta, digtoon oo ay indhaheedu arkaan marka hore waxa ay iyadu leedahay ka hor inta ayan u muhan una hanqal taagin waxa *toobal-caarada* ku ah, waana in dawarsiga afka shisheeye laga haraa. Magac waliba waxa uu leeyahay muuqaalka bulshadiisa; ummad walibana waxa ay u egtahay magaceeda! *'Haruub daatay, dabadiisaa la qabtaaye'*, waxa aan ku soo gunnaanadayaa warqaddan tixihii Ilaahay ha u naxariistee abwaaniinta kala ah Cismaan Yuusuf Keenadiid & Cabdulle Raage Taraawiil sida ay u kala horreeyaan:

Afka inagu gaariyo codkaa laysku garanaayo
Niman baa gensadey oo ka jecel mid ayan gaarayne
Ugumana garawsana raggii Goosanka ahaaye
Labadaa ra'yoo kala geddoon yaw garnaqi doona?

Cismaan Yuusuf Keenadiid, 1966

Labaatan iyo laba aamustiyo, shaqal irmaaneeya
Amraniyo tilmaamiyo gudbe, aade iyo jooge
Isku-dare, xiriiriye falkaab, ereyadeenii ah
Ebyaniyo haddaan magac-u-yaal, ku arkay joornaalka
Mar haddii afkaygii la qoray, aabbe iyo hooyo
Mar haddaan ammaahsigi ka baxay, lagu agoontoobay
Abaal waxa leh nimankii fartaa, soo abaabulaye
Amiirnimo sin iyo garab jirtay, nagu abuureene
Afafkaa qalaad iyo maxaa, eregta ii dhiibtey
Anaa macallinoo raba dad loo, furo iskuulaade

Cabdulle Raage Taraawiil, 1972

F.G. Si aad u fahamto xikmadda qormadan gaaban bal u fiirso magacyada Soomalida marka lagu dhigayo warqad af kale oo Latin ah ku qoran, sida marka la turjumayo waraaqaha dhalashada, kuwa socdaalka iyo kuwa dugsiyadaba; waxa aad arkaysaa dhanka Soomaaliga oo soomaaliyeysan iyo dhanka afka kale lagu turjumay oo carrabla'! Ma qabo in ay jirto dood-cilmiyeed qabta in magaca dhigaal ahaan la turjumi karo, laakiin in xikmaddiisa iyo murtidiisa af kale lagu sheegaa waa biyo kama dhibcaan, haddii la doonayo in nuxurka magaca la fahamsiiyo cid kale oo aan afka asalka ah ku fahmaynin!

W/Q Anwar Maxamed Diiriye
Email: anwar@usfamily.net

Tixraac

Abd-el-Jawad, Hassan. 1986. *'A Linguistic and Socio-cultural Study of Personal Names in Jordan'*. Anthropological Linguistics, XXVIII

Afrax, Maxamed Daahir. 2003. *The Abwaan as Beacon: The Centrality of the Message in Somali Literature with Especial Reference to the Play Shabeelnaagood.* Horn of African Journal,

Copyright © 2010 WardheerNews.com

New Jersey.
Al-Mubarakpuri, Safi-ur-Rahman. 1979. *Ar-Raheeq Al-Makhtuum (The Sealed Nectar): Biography of The Noble Prophet* (Peace be *Upon Him).* Islamic University Al-Madina Al-Munawwara.
Andrzejewski, B.W. 1964. *The Declensions of Somali Nouns*. London: University of London, School of Oriental and African Studies
Armstrong, Karen. 1996. *Jerusalem: One City, Three Faiths*. Ballantine Books, New York Bhabha, Homi K.,ed.1990. *Nation and Narration.* Routledge. London.
Blech, Benjamin & Elaine. June 28, 1999. *Your Name Is Your Blessing: Hebrew Names and Their Mystical Meanings. Jason Aronson.* Washington, D.C.
Cerulli, Enrico. 1959. *Les Noms Personnels En Somali.* Scritti vari Editi Ed Inediti, Vol. 2, Edited by Enrico Cerulli. Somalia.
Diiriye, Anwar Maxamed. 2006. *Literature of Somali Onomastics & Proverbs with Comparison of Foreign Sayings*. Gobaad Communications & Press. Minneapolis.
Diiriye, Anwar Maxamed. April 7, 2006. *Magac & Muuqaal: Mayricidda Hab-dhigaalka Magac Soomaaliga.* Aftahan.com, Wardheernews.com, Redsea-online.com & Mudugonline.com.
Cabdille, Cabdi Aadan "Ceelow." *Murtida Magac-bixinta Dhaqanka Soomaalida.* Hal-abuur, Xirmo I, Tirsi I, Xagaa1993. Boggaga 19-21. London.
Carab, Saalax Xaashi. 2004. *Qaamuus: Erey-koob*e. Machadka Afafka ee Xarunta Cilmibaarista Jabuuti. Jabuuti.
Hal-Abuur *Journal of Somali Literature & Culture*. Volume 1, No.1, 1993
Keenadiid, Yaasiin Cismaan. 1976. *Qaamuuska Af-Soomaaliga.* Wakaaladda Madbacadda Qaranka, Xamar.
Fraser, H. A & Brunner A., 1952. *Local and Scientific Names of the Fishes Collected on the Coast of the Trust Territory of Somalia*, Roma (F. A. O).
Galaal, Muusa Haaji Ismaa'iil. 1956. *Hikmad Soomaali* Edited with Grammatical Introduction and Notes by B. W. Andrzejewski. Geoffrey Cumberlege, London.
--------. 1968. *The Terminology and Practice of Somali Weather Lore, Astronomy and Astrology.* Published by TheAuthor, Mogadishu.
Lewis, I.M., 1959. *The Names of God in Northern Somali*, in "Bulletin of the School of Oriental and African Studies University of London" XXII, 1 London.
Maxamed, Maxamed Cabdi "Gaandi." Hal-abuur, Xirmo 01, Tr2 & 3, Dayr/Jiilaal 1993/1994. *Aafada Ummadda Soomaaliyeed ku Habsatay Kadin Laga Baxo Ma Yeelan Kartaa?* London.
Royal Geographical Society. 1928. *First List of Names inSomaliland Protectorate.*
Sheik-Abdi, Abdi A. 1993. *Tales of Punt: Somali Folktales*. Published by Doctor Leisure, Macomb, Illinois
Sheniti, Mahmud. 1961. *'Treatment of Arabic Names'*, International Conference on Cataloguing Principles Report.
Stewart, Julia. 1996. *1001 African Names: First and Last Names From The African Continent*, A Citadel Press Book by Carol Publishing Group.
Xaange, Axmed Cartan. 1984. *Dalkii Udgoonaa "The Land Of Spices".* Muqdisho, Somalia.
Zaborski, A., 1966-67. *Arabic Loan-words in Somali, Preliminary Survey,* in "Folia Orientalia" 8, Cracovia.
Zorc, R. David & Osman, Madina M., 1993. *Somali-English Dictionary with English Index.* Dunwoody Press, Kensington, Maryland.
Xasan "Aalto", Maxamed C., December, 1997. *Magacyada Gabdhaha Soomaalida*. Soof: Wargeys Biloodlaha Suugaanta & Dhaqanka Soomaalida, Xirmo 2, Caddadka 14aad. Helsinki, Finland.

Copyright © 2010 WardheerNews.com

Anwar Maxamed Diiriye anwar@usfamily.net

Qormadan waxa laga akhriyey *Shir Cilmiyeedkii Daraaseynta Soomaalida (Somali Studies in 21st Century: 10th Triennial SSIA Conference)* ee lagu qabtay *The Ohio State University, Columbus*, intii u dhexeysey August 15-18, 2007. Waxa goortii ugu horreysey lagu soo daabacay *Hal-Abuur Journal of Somali Literature & Culture, Volume 3, Nos. 1&2, 2008. P21-29.*

Copyright © 2010 WardheerNews.com